KANTON
LUZERN

Waaxda Amniga iyo Cadaalada
**Isku-dibaridka kahortagga rabshadaha iyo maareynta khataraha**

# Ka dhanka ah guurka qasabka ah

## Aniga ayaa go'aan ka gaaraya cidda aan guursanayo!

**Si aan ikhtiyaar lahayn qof ma laguugu ballanqaaday, qof ma laguu siiyay ama ma laguu guuriyay?**
Miyaad ka baqaysaa in qof lagu siiyo ama lagu guursado adiga oo aan raalli ka ahayn?
Ma doonaysaa in aad guurkaaga iskaga baxdo laakiin aadan garanayn sidaad uga bixi lahayd?
Ma jiraa qof saaxiibo tihiin oo lagu cadaadinayo in ay guursato iyada oo aan raali ka ahayn?

**Waa maxay guurka khasabka ah?**
Mararka qaarkood waalidiinta, qaraabada ama dadka ku yaqaana waxay isku dayaan inay kugu qasbaan wax ay u arkaan inay adiga kuu fiican yihiin iyagoo isticmaalaya cadaadis ama xoog. Waxaa laga yaabaa inay kugu eedeeyaan inaad reerka u soo jiidayso sharaf dhac haddii aadan oggolaanin guur ama aadan sii wadin guurkaaga. Qofna kuma waydiinayo rabitaankaaga ama rabitaankaaga lama ixtiraamayo. Haddii labada qof ee isqabta aysan wada "oggolaan" karin guurka, markaas wuxuu noqonayaa **guur qasab ah**.
Erayga **guurka qasabka ah** waxaa la isticmaalaa marka aad dareento in qoyskaaga ay kugu qasbayaan inaad guur ku sii jirto oo aan laguu ogolayn inaad iskaga baxdo guurkaas.

**Marka la joogo Switzerland, dumarka iyo ragga waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah. Qof kastaa isaga ayaa go'aansanaya haddii ay rabaan inay guursadaan iyo cidda ay guursanayaan.**

**Waxaa jira siyaabo looga baxo guurka xun – hel caawimaad**
Waxa jira **xarumo khabiir iyo talo-bixin** kuwaas oo caawiya dadka da'da yar ee ku jira xaaladaha adag. Way ku caawin karaan oo waxay ku tusi karaan tallaabooyinka xiga waxay noqon karaan. Shaqaalaha jooga xarumaha la-talinta waxay ku xiran yihiin siyaasadda ilaalinta qarsoodiga xogta oo cidna lama xiriiri doonaan adigoo oggolayn.
Haddii aad rabto, waxaad sidoo kale heli kartaa la-talin qarsoodi ah.
La-talinta inta badan waa bilaash.




ZENTRALSCHWEIZER FACHGRUPPE HÄUSLICHE GEWALT

## Adeegyada la-talinta iyo taageerada

### Haddii aad rabto la-talin ama aad rabto inaad kala ogaato xuquuqahaaga:

**Xarumaha la-talinta dhibanayaasha ee ku yaala Bartamaha Switzerland**

**Lucerne/Nidwalden** https://disg.lu.ch/themen/opferberatung/Opferberatung_inhalt

**Obwalden** https://www.ow.ch/fachbereiche/1676

**Uri/Schwyz** https://www.opferberatung-sz-ur.ch

**Zug** https://www.eff-zett.ch/angebot/opferberatung

**Xarumaha kale ee la-talinta dhibbanayaasha ee ku yaala Switzerland**
www.opferhilfe-schweiz.ch

### Adeegyada la-talinta dheeraadka ah ee loogu talagalay dhibbanayaasha iyo xirfadlayaasha:

**Xarunta kala-talinta guurka khasabka ah** www.zwangsheirat.ch

**Xarunta la-talinta dhalinyarada ee ku taala gobolkaaga** www.no-zoff.ch

**Shaqaalaha arrimaha bulshada ee dugsiga ee jooga dhismaha dugsigaaga**

**Xarunta Kartida ee FABIA ee Loogu Talagalay Socdaalka** www.fabialuzern.ch

### Hoyga/xarumaha, la heli karo 24 saac maalintii:

**Girls' shelter Zurich** www.maedchenhaus.ch 044 341 49 45, 079 478 46 79

**Hoy loogu talagalay wiilasha iyo gabdhaha** www.schlupfhuus.ch 043 268 22 66

**Xarunta magangelinta haweenka ee ku taala Lucerne**
www.frauenhaus-luzern.ch 041 360 70 00

**Hoostel loogu talagalay haweenka oo ku taala Zug**
www.herbergefuerfrauen.ch 041 727 76 86

**Khadka daryeelka ee loogu talagalay dhalinyerada** www.147.ch 147

**Haddii ay jirto xaalad degdeg ah:**
**Lambarka gurmadka booliiska 117**